



Dadka socotada ahi degamada Santa Clara County had iyo jeer waxay u baahdaan qareen ama xeel-dheere ka cawiya is ay u fahmaan arrimaha adage ee looga baahan yahay lana xiriirta shuruucda laanta socdaalka. Hoos waxa ku qoran su'aalo iyo jawabo ku saabsan xeel-dheereyaasha sharciga socdaalka ama aad u heli karaysiin adiga iyo qoyskaagu gargaarka ugu haboon ee lagaa siin karo arrimaha sharciga socdaalka.



Maxuu yahay qareenku halkan?

Dalka Maraykanka Qareenku ama looyarku waa qof bartay tacliin sare kuna qaatay shaadada sharciga ee loo yaqaan Juris Doctor (J.D.) caalim sharciga ah. Si uu haddaba ugu shaqeeyo culuuntiisa waa in ka mid noqdaa ururka qareemada Maraykanka ee loo yaqaan State BAR, wana in uu ku guulaystaa imtixaan ay ka qaadaan ururka qareemadu ee BAR.

Qareenka haysta fasax uu ku shaqeeyo wuxuu awooda:

- In uu siiyo talo xagga sharcia ah qofka u baahda.
- Wuxuu uga hadli karaa maxkamadda.

Sida badan qareenku wuxuu aqoon u leeyahay shruucda meelo gaar ah, Tusaale ahaan qareenka qof ka caawiya arrimaha la xiriira dembiga, waxba ka yaqaan sharciyada laanta socdaalka (immigration law).

Ma Qareenadu oo keliya ayaa iga caawin kara arrimaha sharciga socdaalka?

Maya. Kuwo aan qareen ahayn ayaa laga yaabaa inay kaa caawin karaan dacwadaha qaarkood.. Kuwa aan qareenka ahayni wey baran karaan sharciga laanta socdaalka waayo aragnimo ay heli karaan si ay ugu shaqeeyaan sharciyada laanta socdaalka.

Kuwa aan qareenka ahayni waxay kaa caawin karaan:

- Marka wada shaqeyn la leeyihiin **Wakaalad idman** (accredited agency) oo fasax ka haysata Board of Immigration Appeals (BIA) in Washington, D.C.
- Qof madaxa bannaan oo wakiil idman ah fasaxna ka haysta Board of Immigration Appeals (BIA.)
- La taliye arrimaha laanta socdaalka way ku caawin karaan haddii aysan wax talo ah ku siinayn. Shaqadoodu waa inay ku siiyaan war ku saabsan sharciga socdaalka oo keliya.

Ma joogaan degmada Santa Clara wakaaladahaas idmani?

Wakaaladaha idman ee jooga degmada Santa Clara County waa Catholic Charities, Center for Employment Training (CET), iyo International Rescue Committee, keliya..

Saaxiibkay ayaa ii sheegay in notaayo si degdeg ah iyo lacag yar hawlaha ku fulisa.

La taliye xagga socdaalka ah oo nootayo jooga aan culuunta sharciga baran ama aan xiriir la lahayn qareen amawakaald idamni waxa uu kuu qaban karaa waa innu kula buuxiyo foomamka ee talona sharciga ku saabsan kuma siin karo. Waayo mala culuunta uu ku xalin karo dhibta jirta .



Ka digtoonow nootaayoyinka dadka khalda ee dhaca waa idho-sarcaad lacagta lagaaga qaadanayo.

CIDDEY DOONTO HA NOQOTO cidda ku caawinaysaa ee mar kasta xasuusnow:

- Warso nuqulka qandaraaska adeega.
- Hayso warqadahaaga rasmiga ah (warqadda dhalshada iwm...)
- Ka hub xafiiska ganacsiga wacan (better business bureau)si aad u ogaato bal inay cid hore cabasho ku gudbisay qofkaas.
- La hadal bulshada si aad u ogaato wax fursado kale oo aad heli kartid.

Sidee ayay u shaqeysaa INSTu?

Laanta adeega socdaalka iyo jinsiyad bedelky (Immigration and Naturalization Service) waa wakaalad bixisa danaha socdaal, isla markaasna fulisa shuruucda socdalka iyo dib u celinta iyo xad ilaalinta. Waxay leedahay xafiisyo badan oo kala gedisan. INSTa xafiiskeeda degaanku wuxuu ku yaala San Francisco, in kasta oo INSTu xafiis ku ledahay San Jose. Xafiiska San Jose ee INSTu wuxuu qaabilsan yahay afar degmo, sidaoffice: Santa Clara, Santa Cruz, Monterey, iyo San Benito. Guud ahaan waa wax dhib badaninaad qof telefoonka ka hadashid, waxa ka roon inaad qof ahaan u tegid. Hase yeeshe qofka aan lahayn sharci ama la ga xukumay dib u celin waxa la arkaa in sharciga lagu fuliyo. Waxa ka fiican in qofku ka raadsado talo kuwa bixiya adeegyada sharciga socdaalka marka hore, inta uusan tegin INSTa.

Sidee ayaan qoyskayga u soo dhoofin kara?

Haddii aad rabto inaad qoyskaaga keento waa inaad buuxisaa shuruudaha ah:

- a. Waa inaad rasmi u deggan tahat haysato (green card)
- b. Tahay muwaadin Maraykaan ah.

Qofka haysta Green Card waa uu keeni karaa xaaskiisa iyo carruurtooda aan weli guursan. Qofka muwaadinka Maraykanka ahi wuxuu keeni karaa xaaskiisa, carruurtooda guursatay ama aan guursan, waalidkiisa walaalihiis.

Codsaduhu, ha nqodo ku rasmi u deggan ama muwaadin waa inuu gudbiyo codsiga qoyska taasoo uu ka dalbayo soo gelinta qof ka tirsan qoyska oo sida badan jooga dalka ay u dhasheen. Sida sharciga hadda marka buugan la qoryay jiraa, qofka soo geliya cid dalka Maraykanka uusan u dalbin fasax, waxa uga iman karta dhibaato. La xiriir qof ku xeel dheer sharciga socdaalka inta aadan gudbin codsigaaga.

Nidaamka hadda lagu bixiyo green cardka, wuxuu ku salaysan yahay nidaam qeybo iyo xulasho ah. Sababtaas darteed waqtiga aad ku soo gelin karto ehelkaaga dalku waxay noqon kartaa ilaa 20 sano ama isla markaasba, taasoo ku xiran qaabkaaga sharci, xiriirka ehelnimo ee aad leedihiin qofka iyo dalkii aad marka hore ka soo haajirtay.



Asian Law Alliance

184 East Jackson Street, San, Jose, CA 95112

Tel: (408) 287-9710

Website: www.asianlawalliance-ala.org

Luqadaha: English, Vietnamese, Laotian, Cantonese, Mandarin, Spanish, Japanese

adeegyada: Ka caawiyaan buuxina N-400, Buuxinta foomamka socdaalka bishii hal mar, iyo codsiyada VAWA



Catholic Charities of Santa Clara County – San Jose Office

2625 Zanker Road Suite 201, San, Jose, CA 95134-2107

Tel: (408) 944-0691

Luqadaha: English, Portuguese, Spanish, Tagalog iyo Vietnamese.

Adeegyada: Ka caawinta sharciga socdaalka iyo jinsiyad qaadashada.

Gilroy: 7950 Church Street, Gilroy, CA 95020

Tel: (408) 842-4808

Website: www.ccsj.org

Luqadaha: Spanish

Adeegyada Ka caawinta sharciyada socdaalka.

Chinese American Mutual assistance Association.

1669 Flanigan Dr., San Jose 95121

Tel: (408)274-9282

Luqadaha: Mandarin, Cantonese, Vietnamese and Taiwanese.

Adeegyada: ESL, Immigration, wacyi gelin doorashooyinka, Bbarnaamij Waayeellka ah, kobicinta hogaamiyenimo.

Center for Employment Training (CET)

701 Vine Street, San Jose, CA 95110

Tel: (408) 534-5451

Website: www.cet2000.org

Luqadaha: Spanish iyoturjumad luqado kale.

Adeegyada: La talis xagga sharciga ah, Wakiil noqosho, codsiga visada qoyska, xaashiyada maragga, bedelista qaabkii hore, qabashada hawsha qunsuliyadda, Fasax shaqo u codsiga, warar guud siinta, nootayo sameynta iyo turjumid. Buuxinta codsiyada jinsiyadda, wax-barshada guud, iyo adeeyo kale oo gaar gaar ah.

East San Jose Community Law Center

1030 The Alameda, San Jose 95126

Tel: (408) 288-7030

Website: www.scu.ed/law/ESJCLC

Luqadaha: Turjumid luqadaha badankooda.

Adeegyada: Ka caawinta sharciyada socdaalka.sida VAWA, Is-dhiibka, U doodista qof la masaafurina iyo kuwo kale. Waxa kale oo ka caawiyaan shaqo raadiska.on, xaqqa iibsata, iyo ganacsatada yaryar oo sharciga laga caawiyo.

International Rescue Committee

90 East Gish Road, San, Jose, CA 95112

Tel: (408) 453-3536

Website: www.@theirc.org

Luqadaha: French, Laotian, Persian, Serbo-Croatian, Thai, Vietnamese, Oromo, Somali, Amharic, Assyrian, Arabic

adeegyada: Ka caawinta sharciyada socdaalka, Sharci kala talinta, U dalbashada visooyinka ehelka, ka caawinta qofka dib isu qaabanta sharciga, Hawlaha qunsuliyadda, u codsiga fasaxa shaqada, Marrag u noqoshada, Ka bedelka degganaashashuruuda ku xiran, Xaashiyada socdaalka qaxootiga, Jinsiyad qaadashada, xaashiyaha ajnabiga iyo kaar ka bedelka, Dalbashada xaqqa war helista, caddeynta dukumentiga, notaayo, sawir qaadis, warar siin iyo tilmaan bixin.

Santa Clara County District Attorney's Office Consumer Projection Unit

70 West Hedding Street, West Wing, 4th floor

San Jose, CA 95110

Tel: (408) 792-2880/299-2206

Website: www.santaclara-da.org/consumer.html

Luqadaha: Farsi, Korean, Spanish, Mandarin Taiwanese, Vietnamese, Laotian Tagalog, French, German.

Adeegyada: Waxay eegaan cabashooyinka ku saabsan khiyaamooyinka arrimaha socdaalka. Waxay dhexdhexaadiyaan a dugsiyada: ardayda iyo macalimiinta, waalidka, macalimiinta, maamulka, dariska iyo ganacsiyada dugsiyadu saameynta ay ku leeyihiin.



Service Immigrant Rights & Education Network

778 N. First St., #202, San Jose, 95112

Tel: (408)286-5680

Immigrant Assistance & Information Lines:

Spanish: (408)286-1698

Vietnamese: (408)286-5680 x 1448

Farsi: (408)286-5680 x 108

Chinese: (408)286-5680 x 109

Website: www.siren-bayarea.org

Adeegyada: War siin iyo tilmaan ku saabsan gargaarka bulsh, wacyi gelinta bulshada xagga deeqda guud (Public benefit) u doodistain xeerka loo fududeeyo. Tababar iyo gargaar aqooneed xagga socdaalka iyo arrimaha la xiriira.

